

## Kala hadlida dadka reer Alberta Qorshaha Hawlgabka Alberta oo imaan kara

Oktoobar 12, 2023

---

Dadka reer Alberta waxaa lagu casuumayaa inay ka doodaan natiijooyinka warbixin cusub, oo madax banaan oo ka hadlaysa Qorshaha Hawlgabka Alberta (APP) oo imaan kara.

Guddiga Fikir Uruurinta Qorshaha Hawlgabka Alberta, oo uu hogaaminaayo khasnajibii hore ee gobolka Jim Dinning, ayaa ku casumaaya dadka reer Alberta inay ka doodaan warbixin uu soo saaray khabiirka madaxa banaan ee la taliyaha arimaha Hawlgabka LifeWorks, taa soo qeexaysa sida qorshaha hawlgabka gobolku u shaqayn karo.

“Hadda oo warbixinta LifeWorks ay soo baxday si looga doodo, guddigeenna ayaa loo xilsaaray inay dhegeystaan dadka reer Alberta ayna dhegeystaan fikradahooda, ra’iyadooda iyo walaacyada ay ka qabaan qorshaha Hawlgabka ee gobolka. Arrin sidaan u weyn, dadka reer Alberta ayaa xaq u leh dood qaran, oo dadka waaweyni yeeshaan.”

*Jim Dinning, Guddoomiyaha, Guddiga Wada Shaqaynta ee APP*

Fikir uruurinta bulshada ayaa lagu bilaabay xog uruurin onlayn ah marka warbixinta LifeWorks la baahiyay Seteembar 21 guddiga fikir uruurinta ayaana bilaabi doona taxaneyaasha taleefanka ee kulannada xarunta dawlada laga bilaabo Oktoobar 16. Dadka reer Alberta ayaa u dhegeysan kara si Imuuqaa ah kulan kasta oo onlayn ah ayagoo gujinaaya lifaaqa ku qoran webseedka, ayadoo aan laga eegayn meesha ay ku nool yihiin. Si aad u hesho faahfaahin ku aaddan sida looga qaybgalo, dadka reer Alberta waa inay booqdaan [AlbertaPensionPlan.ca](http://AlbertaPensionPlan.ca).

Warbixintu waxay sheegaysaa in Qorshaha Hawlgabka ee Alberta uu dadka reer Alberta u sahlayo gunnooyinka heawlgabka uuna gaarsiinaayo kaydada balaaran ayagoo ku darsanaaya qoondooyin yaryar iyo gunnooyin sarreeya ee qoysaska iyo dadka shaqo gabka ah.

Guddiga wada shaqayntu wuxuu uruurinayaa fikradaha dadka Alberta ee ku aadan saamaynta, fursadaha iyo caqabadaha abuurista qorshaha Hawlgabka gobolka. Guddigu waxay intaas kadib soo gudbin doonaan warbixin ku saleysan fikradaha gobolka oo dhan laga uruurshay. Qorshaha Hawlgabka ee Alberta ayaa lagu ansixin karaa afti dadweyne kahor inta aan la dhaqan gelin.



### Taariikhaha iyo waqtiyada aad taleefanka u dirayso xarunta magaallada

Waqooyiga Alberta - Isniinta, Oktoobar.16, 6:30 p.m. ilaa 8 p.m.

Koonfurta Alberta - Talaadada, Oktoobar. 24, 6:30 p.m. ilaa 8 p.m.

Calgary iyo aagagga ku xeeran - Khamiista, Noofeembar 9, 6:30 p.m. ilaa 8 p.m.

Edmonton iyo aagagga ku xeeran - Khamiista, Noofeembar 16, 6:30 p.m. ilaa 8 p.m.

Bartamaha Alberta - Arbacada, Noofeembar 22, 6:30 p.m. ilaa 8 p.m.

### Macluumaad la xidhiidha

- [Qorshaha Hawlgabka Alberta](#)

### Su'aalaha warbaahinta

Guddiga Khasnadda iyo Xiriirada Dhaqaalaha

[tbf.communications@gov.ab.ca](mailto:tbf.communications@gov.ab.ca)